



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod. 39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 6aad	Kulanka: 4aad
Taariikhda: 28/04/2025	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 11:54 AM	Saacadda uu Xirmay: 12:10 PM
Shir Guddoonka Fadhiga: Guddoomiye ku-xigeenka 2aad Golaha Aqalka Sare Senator Cabdulaahi Cali Xirsi (Tima cadde).	Guntanka Kulanka: 29 Senator
Martida Kulanka: Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Maaliyadda Mudane Cabdiqafaar Cilmi Xaange.	Ajendayaasha Kulanka: - Akhriinta Ayadaha Qur'aanka - Ansixinta Ajandaha - Akhrinta 3^{aad} ee Hindise-sharciyeedka Hay'addaha Maaliyadda. - Akhrinta 3^{aad} ee Hindise-sharciyeedka Canshuuraha Dakhliga - Akhrinta 3^{aad} ee Hindise-sharciyeedka Shirkadaha Camiska. - Akhrinta 3^{aad} ee Hindise-sharciyeedka Wax-ka-badalka Sharciga Lacag Dhaqista iyo ka Hortaga Maalgelinta Argagixisada.

Furitaanka Kulanka:

Senator Xuseen Maxamed Daahir ayaa akhriyey Aayadaha Quraanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajendayaasha Kulanka:

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad Golaha Aqalka Sare Senator Cabdulaahi Cali Xirsi ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajendaha kulanka, codaynta ayaa u dhacday sidaan:

Oggol: 29 Senator

Ka aamusay: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad Golaha Aqalka Sare Senator Cabdulaahi Cali Xirsi ayaa u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska Senator Cabdi Axmed Dhuxulow (Dhagdheer), si uu Golaha uga hor akhriyo Warbixinada Akhrinta 3^{aad} ee Hindise-sharciyeedka Hay'addaha Maaliyadda, Akhrinta 3^{aad} ee Hindise-sharciyeedka Canshuuraha Dakhliga, Akhrinta 3^{aad} ee Hindise-sharciyeedka Shirkadaha Camiska iyo Akhrinta 3^{aad} ee Hindise-sharciyeedka Wax-ka-badalka Sharciga Lacag Dhaqista iyo ka Hortaga Maalgelinta Argagixisada. Warbixinta kaddib, Guddoomiye ku-xigeenka 2aad Golaha Aqalka Sare Senator Cabdulaahi Cali Xirsi ayaa cod geliyey Ansixinta Hindise Sharciyeedyadaan, waxayna u dhacday sidan:

- **Hindise-sharciyeedka Hay'addaha Maaliyadda:**

Oggol: 27 Senator

Ka aamusay: 1 senator

Diidmo: Majirin

- **Hindise-sharciyeedka Canshuuraha Dakhliga:**

Oggol: 27 Senator

Ka aamusay: 1 senator

Diidmo: Majirin

- **Hindise-sharciyeedka Shirkadaha Camiska:**

Oggol: 27 Senator

Ka aamusay: 1 senator

Diidmo: Majirin

- **Hindise-sharciyeedka Wax-ka-badalka Sharciga Lacag Dhaqista iyo ka Hortaga Maalgelinta Argagixisada:**

Oggol: 27 Senator

Ka aamusay: 1 senator

Diidmo: Majirin

Ansixinta kaddib, Guddoomiye ku-xigeenka 2aad Senator Cabdulaahi Cali Xirsi (Tima cade) ayaa u yeeray Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Maaliyadda Mudane Cabdiqafaar Cilmi Xaange si uu Senatarada uga mahadceliyo ansixinta Hindise-sharciyeedyada.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajendayaasha kulanka.
2. Ansixinta Hindise-sharciyeedka Hay'addaha Maaliyadda.
3. Ansixinta Hindise-sharciyeedka Canshuuraha Dakhliga.
4. Ansixinta Hindise-sharciyeedka Shirkadaha Camiska.
5. Ansixinta Hindise-sharciyeedka Wax-ka-badalka Sharciga Lacag Dhaqista iyo ka Hortaga Maalgelinta Argagixisada.

Ugu dambayntii, Guddoomiye ku-xigeenka 2aad Senator Cabdulaahi Cali Xirsi (Tima cade) ayaa kulanka soo xiray Sacadu markay ahayd **12:10 PM**.

DHAMAAD